



Ilmo dameer ah



- ✎ Lindiwe Matshikiza
- ✎ Meghan Judge
- ✎ Anwar Mohamed Dirie
- 💬 somali
- 🔊 nivå 3



Gabar yar ayaa aragtay muuqaal aan la garaneyn oo masaafu ka muuqdo.



Markii uu muuqaalki soo dhowaaday, waxa ay aragtay in ay tahay haweeney xaamilo culus ah.



Xishood laakiin geesi nimo, gabadhii waxa ay ku sii dhowaatay haweeneydii. "Waa in ay nala joogtaa," ayay gabadha dadkeedii go'aansadeen. "Iyada iyo ilmaheedaba waa aannu nabad gelinaynaa."





Laakiin markii ay ilmihii arkeen, qof walba gadaal ayuu argagax ugu booday. “Dameer?!”



Qof waliba muran ayuu bilaabay. "Waxa aynnu ballan qaadnay in aan ilmaha iyo hooyadaba nabad gelyo siinno, waana in aan sidaas yeelnaa," qaar baa sidaa yiri. "Laakiin waxa ay noo horseedi doonaan nasiib darro!" qaar kale ayaa sidaa iyana yiri.



Sidaa darteed haweeneydii way cidlowday mar kale. Waxa ay ka la yaabaneyd wixii ay ku sameyn lahayd ilmahan qaabka daran. Waxa kale oo ay ka la yaabaneyd wixii ay iyaduna isku sameyn lahayd.



Aakhirkii waxa ay isku qancisay in ay aqbasho in uu ilmaheedii yahay, iyaduna ay hooyadiis tahay.



Hada, hadii uu dameerka ku joogi lahaa sidiisi, bar yaraanta, wax walbo waxaan ahaan lahaayeen si ka duwan sidan. Laakiin ilmihiid dameerka ahay wuu koray oo koray ilaa uu la ekaan waayay dhabarkii hooyadii. Si kasta oo uu isku deyay na, waa uu u dhaqmi waayey sidii dadkii oo kale. Hooyadii aad bay u daashay oo waa ay isku buuqday. Marmar waxa ay isku dayday in uu sida xayawaanka u shaqeeyo.



Jahawareer iyo carro ayaa iskugu darsantay dameerkii. Sidan ma yeeli karo sidaana ma yeeli karo. Sidan ma noqon karo sidaana ma noqon karo. Mar uu aad u xanaaqay, ayaa uu maalin hooyadii laad ku kiciyey oo dhulka ku tuuray.



Dameerkii ceeb ayuu dareemay. Waxa aanu bilaabay in uu aad u ordo oo uu u cararo meel fog.



Waqtigii uu joojiyay orodkii, habeen bay ahayd, Dameerkiina waa uu lumay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdigi uga dhex gunuunacay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdiga ka daba dhahay. Waaxuu ahaa mid cidloobay. Intuu isku duuduubay sidii kubad adag, ayuu la dhacay hurdo dheer oo dhiban.



Dameerkii waxa uu toosay isaga oo oday la yaab leh hoos usoo eeegayo. Indhihi odayga ayuu eegay waxuu na billaabay inyar oo rajo ah in uu dareemo.



Dameerkii waxa uu raacay si uu ula joogo odagii, kaas oo baray qaabab kala duwan oo ah sida loo noolaado. Dameerkii waxa uu noqday mid wax dhageystay oo na wax bartay, sidoo kale ayuu sameeyay odaygana. Waa ay is caawiyeen, waa ayna wada qosleen si wada jir ah.



Subax subaxyada ka mid ah, ayaa uu odagii
weyddiistay Dameerkii in uu u qaado buur
dhaladeed.



Meeel kore oo daruuraha ka mid ah ayey hurdo kula dul dhaceen. Dameerkii waxa uu ku riyooday hooyadiis oo xanuunsanaysa oo isaga u yeeraysa. Markii uu toosay na...




... daruurihii ayaa la libdhay asaga iyo saaxiibkiis ba, odayga duqa ahaa.



Ugu dambeyntii dameerkii waa uu ogaaday waxa
in la sameeyo ah.



Dameerkii waxa uu helay hooyadii, oo cidlootay una barooranaysa ilmaheedii lumay. Muddo dheer ayay is eegteen midba midka kale. Dabadeedna ihabisi siiyeen waliba si adag.



Ilmihi dameerka ahay iyo hooyadii waa ay wada koreen waxa ayna heleen qaabab badan oo ay ku wada noolaan karaan midba midka kale dhiniciisa. Tartiib tartiib, dhinacyadooda oo dhan, qoysas ayaa bilaabay in ay soo dagaan.



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Ilmo dameer ah

Skrevet av: Lindiwe Matshikiza

Illustret av: Meghan Judge

Oversatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreført av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons
[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens](#).